



Waxa tallaalka xoojinta ah uu ka kooban yahay



Xoojiyeyaal/Boosters: Muxuu yahay?

Tallaalka xoojinta ah waa kuurada dheeraadka ah ee tallaalka. Waxay kaa caawinaysaa kordhinta wax-qabadka difaaca jirka iyo sii dheeraynta difaaca ka dhanka noocyada halista ah ee COVID-19.

Xoojiyeyaal (Boosters): Haddii aniga oo qaatey 2 kuuro ee tallaalka ah uu igu dhaco COVID-19, miyaan weli u baahanahay tallaalka xoojinta ah?

Haa. Caabuqu wuxuu bixiyaa xoogaa difaac ah, laakiinse tallaalka wuxuu gacan ka geystaa sii wanaajinta wax-qabadka difaaca jirka wuxuunna bixiyaa difaac wanaagsan oo muddo-dheer raagaya.

Guddiga Ka Soo Talo-bixinta Qaranka ee Tallaalka ayaa ku taliyey in aad qaadato tallaalka xoojinta ah 3 bilood ka-dib markii uu kugu dhacey caabuqa COVID-19 ama ugu yaraan 6 bilood ka-dib kuuradaada ee ugu dambaysay.

Qoraalkan looguma talogalin in uu beddel u noqdo daryeelka iyo talada xirfadeed. Had iyo jeer raadso adeegyada xirfadle caafimaad ama adeeg bixiye caafimaad kale oo la aqoonsan yahay si aad u weyddiiso su'aalaha laga yaabo in aad qabto.



Financial contribution from
Avec le financement de

Public Health Agency of Canada
Agence de la santé publique du Canada



Waxaa xaqiijiyey MedComm – oo ah Naadiga Gaarista ee Ururka Ardeyda Caafimaadka ee McGill.



Ma dooneysaa in aad wax badan oggaato?

- ["Get a booster dose"](#) (April, 2022)
- ["COVID-19 Vaccine Boosters"](#) (April, 2022)



Waxa tallaalka xoojinta ah uu ka kooban yahay



Xoojiyeyaal (Boosters): Maxay tahay sababta aan mid ugu baahanahay?

Tallaallada waxay bixiyaan difaac ka dhan ah noocyada halista ah ee jirrada, laakiinse difaacan muddo ka-dib ayuu yaraan karaa. Tallaallada xoojinta ah ayaa gacan ka geysan kara joogteynta iyo xoojinta difaaca ka dhanka ah astaamaha daran ee cudurka COVID-19.

Xoojiyeyaal (Boosters): Maxay uga hadlayaan mid 4aad? Goormee ayuu dhammaanayaa?

Tallaallada waxay sii wadayaan in ay bixiyaan difaac ka dhan ah noocyada halista ah ee jirrada, laakiinse difaacan muddo ka-dib wuu yaraanayaa, gaar ahaan marka ay soo ifbaxaan noocyo cusub oo cudurka ah.

Tani waa sababta xoojiyeyaal dheeraad ah loogu baahan karo, gaar ahaan dadka nugul, t.a. dadka waayeelka ah.

Waa maxay 'astaamaha ba'an' ee cudurka COVID-19?

Kiisaska daran ee COVID-19 ayaa waxaa ka mid ah oof-wareen daran, hawlgabka xubnaha jirka iyo dhimasho suuragal ah.

Dadka qaarkii waxay qaadaan astaamaha COVID-19 oo fudud. Qaar badan ayaan sidaasi u nasiib badnayn. Astaamaha ba'an waxaa ka mid ah:

- neefsashada oo dhib kugu noqota ama neef yaraansho ba'an
- cadaadis ama xanuun joogto ah oo aad xabadka ka dareento
- jahwareer
- in ay dhib kugu noqoto soo kicidda ama in aad soo jeedo
- Lakabka ka hooseeya ciddiyaha, bushimaha, ama maqaarka oo yeesha midab dilan, cawlan ama buluug ah.
- Haddii aad leedahay astaamahan, wac 911.

Qoraalkan looguma talogalin in uu beddel u noqdo daryeelka iyo talada xirfadeed. Had iyo jeer raadso adeegyada xirfadle caafimaad ama adeeg bixiye caafimaad kale oo la aqoonsan yahay si aad u weyddiiso su'aalaha laga yaabo in aad qabto.

Financial contribution from
Avec le financement de



Public Health Agency of Canada
Agence de la santé
publique du Canada


Institute - Institut

Waxaa xaqiijiyey MedComm – oo
ah Naadiga Gaarista ee Ururka
Ardeyda Caafimaadka ee McGill.



Ma dooneysaa in aad wax badan oggaato?

- ["Get a booster dose"](#) (April, 2022)
- ["COVID-19 Vaccine Boosters"](#) (April, 2022)